



WARQADA MACLUUMAADKA KUSAABSAN UURKA IYO ILMA DHALISTA: ABRIL 2002

Wadaagista daryeelka dumarka uurka leh ee dhakhtarka dumarka ee royal women's hospital

Waa maxay wadaagista daryeelka dumarka uurka leh?

Wadaagista daryeelka dumarka uurka leh macneheedu waxa weeye inta aad uurka leedahey waxaad u tagi kartaa dhakhtar cusbataalka jooga iyo dhakhtarkaaga xaafadaada ama umulisada bulshada. Wadajir waxay ka wada shaqeynayaan daryeelkaaga. Waxaad ku umuleysaa ilmahaaga dhakhtarka haweenka ee Carlton (Royal Women's Hospital in Carlton).

Waa maxay faa'iidooyinka waadaga daryeelka dumarka uurka leh?

Faa'iidada ugu weyni waa adigoo la kulmaya daryeel isku mid ah inta aad uurka leedahay oo dhan. Kaasi waxaa uu noqon karaa dhakhtarka xafadaada ama umulisada bulshada. Taas micnaheedu waxaa weeye waxaad kari kartaa

- In aad aragto daryeele u dhow aqalkaaga
- Inaad sii wado inaad la kulanto daryeele isku mid ah xataa marka ilmahaagu dhasho

Wadaaga daryeelka dumarka uurka leh waxaa sidoo kale loo heli karaa dumarka taga xarunta dhalmada ee reerka (Family Birth Centre) iyo qaybta bulshada ee cusbataalka (Hospital Community Clinics).

Dadka daryeelka wadaaga daryeelka dumarka waxaa ay ka qaadaan dumarka lacag aan laga soo ceshen Karin midhikeerka. Lacagta ay qadaana wey kala duwan tahay. Fadlan waxaad kala faalootaa wixii su'aalo ah ee ku saabsan daryeelaha aad doorato inaad u tagto.

A Royal Women's Hospital Well Women's Publication



Cusbataalka haweenku (Royal Women's Hospital) waxa uu sidoo kale sameeyaa bukaan socodyo busheed (**Community Clinics**) taas oo ay ka shaqeeyaan shaqaalaha cusbataalka, waana bilaash. Haddii ay kugu haboon tahay, waad iman kartaa cusbataalka qaybtiisa bukaan socodka adigoo balan samaysanaya halkii aad ka tagi lahayd cusbataalka. Bukaan socodyadani waxa ay ku yalaan Kensington, Coburg and Moonee Ponds.

Dhakhtarka aan hada arkaa daryeel ma isiin karaa?

Dhakhtarka xaafadaada/umulisadu waa in aqoonsi ay ka haystaan Cusbataalka Haweenka (Royal Women's Hospital) in ay bixiyaan Wadaagista Daryeelka. Haddii dhakhtarka/umulisada xaafadaadu aaney haysan aqoonsigaas waa ay ka dalban karaan Cusbataalka Haweenka (Royal Women's Hospital).

Marka lagu qoro Wadaaga Daryeelkaga, waxaa lagu siin doonaa Fayl lagu qoro maclumaadka Uurka. Fadlan sedo faylkan markasta oo aad booqaneysid dhakhtarka iyo marka aad umuleysid. Taasi waxay hubineysaa in maclumaadka uu yahay mid sax ah.

Waad ka bixi kartaa Wadaaga Daryeelka markasta oo aad jecleysato inta aad uurka leedahay waxaad la xidhiidhaa isu duwaha Wadaaga Daryeelka. Haddii aad xanuun dareento inta aad uurka leedahay, Wadaaga Daryeelku ma'aha mid kugu haboon xiligaas waxaad dib ugu noqon kartaa qaybta bukaan socodka ee Cusbataalka Haweenka (Royal Women's Hospital clinics).

Balamaha

Waxaa maclumaad ah iyo balamaha ku saabsan Wadaaga Daryeelka dumarka uurka leh waxaad la xidhiidhaa isku duwaha 8345-2000.



WARQADA MACLUUMAADKA KUSAABSAN UURKA IYO ILMA DHALISTA: ABRIL 2002

Jadwalka aad ku booqaneyso Daryeelka la wadaageyo

Fadlan waxaad ogataa in booqashadani tahay mid caadi ah. Waxaa laga yabaa in jadwalakani ka duwanaado marka xaaladaada loo eego

| | |
|--------------------|--|
| 8-12 Wiig: | Booqashada koowaad waa Qaybta Bukaanku Socodka ee Cusbutaalka Haweenka (Royal Women's Hospital or an RWH Community Clinic) si aad u balansatid in aad la kulantid umulisida iyo dad kale oo daryeelka caafimaadka ku takhasusey. Uurka oo la eegi doono (<i>Antenatal screening tests</i>). |
| 16 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada. <i>Si loo eego hidaha (Maternal Serum Screening Test) (waa ikhtiyaar xiligan)</i> |
| 18-20 Wiig: | Khashaafed (<i>Ultrasound</i>) |
| 20 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada. |
| 26 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada. |
| 26 Wiig: | Booqo Qaybta Bukaanku Socodka ee Cusbutaalka Haweenka (RWH or Community Clinic) si balan laguugu sameeyo oo ku saabsan wareysi lagula yeelanayo kahor inta aanad lagu dhigin dhakhtarka iyo qorshahaaga marka aad ka baxaysid iyo in la eego inaad macaan leedahey iyo in la giyaaso tirada unugyadaada cad cad (<i>GCT for diabetes, Hb, Rh antibodies</i>) (<i>haddii loo baahdo</i>) |
| 30 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada. |
| 33 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada. |
| 36 Wiig: | Booqo Qaybta Bukaanku Socodka ee Cusbutaalka Haweenka (RWH or Community Clinic) si balan laguugu sameeyo <i>GBS test, Rh antibodies</i> (<i>haddii loo baahdo</i>) |
| 38 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada |
| 40 Wiig: | Booqo dhakhtarkaaga ama umilisada |
| 41 Wiig: | Booqo Cusbutaalka Haweenka (RWH) Si aad ula kulanto dhakhtar ku xeel dheer arimaha dhalnada (<i>haddii loo baahdo</i>) |

A Royal Women's Hospital Well Women's Publication



Dhakhaterkaaga/umulisadaada ka tirsan Daryeelka Wadajirka ah waa:

.....